

WARQAD WARBIXINEED



SAMBU- waa koox qiimayneed oo diyaar u ah marka ugu horreysa ee la ogaado welwel, tusaale ahaan dugsiga xanaanada ama dugsiga. Kooxda SAMBU waxa ku jira howlwadeenno, kuwaas oo iskaashi kadib siin doono carruurta, dhalinyarada iyo qoysaskooda taageero waqti hore ah iskuna dubaridaaya iyada oo loo marayo ku wareejinta hay'adda ay khuseyso.

Yaa loogu talagalay

Kooxda SAMBU ee magaalada Lidköping waxay u shaqeeyaan carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 20 jir.

Sidee u dhacdaa

Marka qof uu dareemo welwel la xariiro ilmo ama qof dhalinyaro ah, waa in welwelkani loo gudbiyaa madaxa ugu dhow. Haddii la dareemo baahi loo qabo in dhowr howlwadeenno loo baahanyahay si awoodo looga yeesho siinta caawinta ugu wanaagsan ayaa waxaa lasoo geliyaa shaqada kooxda SAMBU. Mas'uuliyiinta carruurta waa la wargeliyaa oo ogolaansho qoraal ah ayaa laga codsanayaa si kiiska uu gacanta ugu galo kooxda SAMBU.

Sidaa darteed ayuu SAMBU u jiraa

Si carruurta iyo dhalinyarada loo siiyo dariiqa ugu dhaqsaha badan ee loo heli karo caawin sax ah ayaa waxaa loo baahanyahay xirfadlayaasha khibrada leh iyo aqoonta inay wada shaqeeyaan. Waxay taas ku sameeyaan gudaha kooxda SAMBU. SAMBU waxay bixisaa fursad lagu helo kiisas horay loo ogaaday, taas oo macnaheedu yahay in caawinta iyo taageerada lagu bixin karo heerka saxda ah si dhakhso ah. Mas'uulka carruurta waxa uu warcelin ku helayaa isbuuc gudahiisa ka dib markii kooxda SAMBU ay kulankooda yeeshen, kadibna kiiska loo gacan geliyo hay'adda ku habboon. SAMBU waxay u joogtaa si taageero iyo talo bixiye ugu noqoto qof kasta oo xariir la leh carruur iyo dhalinyaro gudaha xirfaddooda.

Haddii aan doonayo in aan wax badan ogaado

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SAMBU-Lidköping waxaad ka heleysaa lidkoping.se/Barn ama waxbarasho/taageero iyo caafimaadka dugsiga. Halkaa waxaad ka arki kartaa cidda ka tirsan kooxda iyo taariikhaha ay yeelanayaan kulamadooda. Adiga ka xirfadle ahaan waxa kale oo jira iimaylo xidhiidheed iyo foomamka aad ugu baahan tahay shaqadaada.

Med stöd från

